



Hennepin Schools

1001 E. 46th Street, Minneapolis, MN 55407
OFFICE: (612) 843-5050 FAX: (612) 871-2406
EMAIL: info@hennepinschools.org
www.hennepinschools.org

Board of Directors
Charlayne Myers, Board Chair
Kaltun Abdi
Christina Lacina
John Slavik
Mahdi Nur
Khalid Omar
Nancy Vintimilla

Janaayo 13, 2025

Dhamman Waalidiinta, shaqalaha, iyo xubnaha bulshada;

Dugsiyada Hennepin (HS) waxay galeen sanadkii saddex iyo toban ay soo jireen. Marka loo fiiriyo qodobka sharciyada Minnesota 124E.7 ee iskulada jartarka iyo xeer dhaqanka u gaar ah, HS waxay qaban doontaa doorashada sanadka. Tan iyo intii ay soo jireen, Gudiga HS si buuxda bay ugu dhaqmeen sharciga MN. Gudiga hadda jira waxay ka kooban yahiin 7 xubnood (1 qof xubnaha bulshada ah, 2 macalin, iyo 1 waalid). Sannadkaan afar xubnood ayaa loo tartami doona oo kale ah (1 xubin bulshadda oo waalidku ka qayb geli karin, 2 xubin macalin, iyo 1 xubnood oo waalidka u kali ah).

Musharaxa ka Qayb Gali kara :

Waalidiinta ardayda HS oo kali ah ayaa isku sharixi kara xubinta gudiga waalidka. Fadlan la socda, macalimiinta, waalidka, masuuliinta sharciga ah ma isku sharixi karaan xubinta gudiga bulshada. Balse, waxay xaq u leeyihiin inay magacaabaan xubin bulshadeed aan waalid ahayn oo doorashada gudiga ka qayb qaadata. Waa sharci in maamulka iyo shaqaalaha iyo xattaa gudda HS ee hadda jira inay ku gudbaan danbi baaris buuxda ka hor inta ay ka qayb gelin doorashada iyo magacaabidda gudiga.

Cidda Codeyn Karta:

Waa sharciga Minnesota 124E, in shaqaalaha HS oo dhan ayna ka mid yihiin macalimiinta qandaraaska iskaashatada ku jooqta, xubnaha gudiga agaasinka, waalidiinta iyo mas'uulada sharciga ah ee ardayda ka diwaan gashan HS ayaa xaq u leh inay codeeyaan oo doortaan xubnaha gudiga dugsiyada. Qoys walba waxuu xaq u leeyahay labo cod iyadoo aan loo eegeyn tirada ardayda uga diwaan gashan HS. Ka qayb galkaaga ayaa muhiim u ah himilada HS. Doorashadu waxaa la qaban doonaa shirka waalidka-macalimiinta ee 12ka, 13ka iyo 14ka Febraayo, 2025.

Bogga soo socdo waa dulmar faahfaahsan oo ku saabsan qorsha doorashada 2025 ee gudiga, waxaan ku lifaaqan foomka magacaabida gudiga HS warqadda.



Hennepin Schools

1001 E. 46th Street, Minneapolis, MN 55407
OFFICE: (612) 843-5050 FAX: (612) 871-2406
EMAIL: info@hennepinschools.org
www.hennepinschools.org

Board of Directors
Charlayne Myers, Board Chair
Kaltun Abdi
Christina Lacina
John Slavik
Mahdi Nur
Khalid Omar
Nancy Vintimilla

Faahfaahin Qorshaha iyo Jadwalka Doorashad Gudiga HS ee 2025:

Qorsha Goolasha: Mid furan, Qarsoodi lahayn, iyo Waafaqsan sharciga.

Waxaa la raaci doonaa tilaabooyinka soo socda si loo hubiyo in Doorashada Gudiga HS ay tahay mid ku dhisan ku dhaqanka sharciga MN 124E.07 ee dugsiyada jaartarka ah:

1. Guddiga hadda jira waxay qaateen talaabooyinkan:
 - a. Ayadoo loo eegayo xeerka xubnaha guddiga ee hadda jira, gudiga HS waxay go'aami yeen in sannadkaan afar jago tartan loo geli doono (1 xubnood oo waalidka u kali ah iyo 1 xubin macalin).
 - b. Gudiga waxay magacaabeen guudoomiya doorashada, **Mr. Yusuf Mohamed**, Agaasimaha Hawlaha Dugsiga HS ee Desember 17th, 2024.
2. Madaxa Doorashada HS waxay hubin doonaan in la qaaday qodobada so socda:
 - a. Ogeysinta (website, email, in warqado tarjuman guryaha loogu diray) waqtida la magacaabay gudiga, Maalinta Tartanka la qabanayo, iyo habka doorashada loo qaban doono, in Foomka Magacaabida dad weynaha loo diray 30 malmood ka hor malinta doorashada, Janaayo 13, 2025).
 - b. Aqbalida iyo helitaanka magacayada iyo macluumaad buuxa ee mushrax walba inta u dhexeesa Janaayo 13 ila 27, 2025.
 - c. Caddeyn in musharx walba u qalmo inuu ka qayb galo tartanka si waafaqsan sharciga MN 124E.07 ee iskuulada jartarka ah (kana mid tahay danbi barista).
 - d. Diyaarinta warqadaha cod bixinta, Janaayo 31, 2025.
 - e. In la gaarsiiyo waalidiinta HS iyo shaqaalaha war bixinta iyo macluumaadka ee musharax walba ayadoo la adeeg sanyo (website, email, qoraalo tarjuman oo guryaha loogu dirayo) Janaayo 31, 2025.
 - f. In la qabto doorashada, Febaraayo 12 ila 14, 2025 (waqtiga shirka waalidiinta-macalimiinta).
 - g. In loo sheego waalidiinta HS iyo shaqaalaha natiijada doorashada ayadoo la adeeg sanyo (website, email, qoraalo tarjuman oo guryaha loogu dirayo) Maarso 3, 2025.
 - h. Hubinta gudiga cusub inay la socodaan tababarka cusub ee looga baahan yahy iyo sharci MN 124E.07 ee dugsiyada jaartarka ah iyo waqtiga ay xilka bilaabi doonaa.
3. Maamulka HS waxay:
 - a. U sheegi doonaa dhamaan xubnaha gudiga cusub kulamada gudiga ee sanadka oo dhan 2025/2026.
 - b. Soo dhaweeynta xubnaha gudiga la doortay lana sheego inay oo shaqada xafiiskooda bilaabi doonaan 07/01/2025 (iyo inta mudada xilku dhan tahay 3 sanno).

Fadlan, waxii su'aal ah la soo xariir hselections@hennepinschools.org ama wac 612-843-5057.

Mahadsanid,

Yusuf Mohamed, (Agaasimaha Hawlaha Dugsiga) iyo Guudoomiyaha Doorashada.



Hennepin Schools

1001 E. 46th Street, Minneapolis, MN 55407
OFFICE: (612) 843-5050 FAX: (612) 871-2406
EMAIL: info@hennepinschools.org
www.hennepinschools.org

Board of Directors
Charlayne Myers, Board Chair
Kaltun Abdi
Christina Lacina
John Slavik
Mahdi Nur
Khalid Omar
Nancy Vintimilla

Foomka Dhoorashada Musharaxa 2025 Gudiga ee HS

Si aad u dalbato:

Ku soo dir foomka tartanka oo dhameeys tiran emailkan hselections@hennepinschools.org; US mail ama keen xafiiska HS kuna soo hagaaji Gudoomiyaha Doorashada ugu danbeeyn January 27, 2025 (5:00 PM). Foomka Musharax oo buuxa waxaa ka mid ah.

1. Magaca (kan hore –kan danbe)
2. Telefoonka:
3. Email-ka
4. Soo raaci warqad (ha ka badin 1bog, font size 12) aad ku sharixaysid sababta aad u dooneeyso in aad noqotid xubin gudiga iyo cadayn dan aadan ku la hayn HS.
5. Ku soo dar (resume) warbixin buuxda ee waxqabadkaaga (2 bog ugu badnaan).
6. Ku soo dar taarikh nolodaadkaaga si loogu daro warqadda doorashada (hana ka badin 250 eray).
7. Ku soo dar 1 sawir hay'adaha warbaahinta loo gudbin karo (qasab ma aha).
8. Fadlan buuxi warqada ogolaanshaha Danbi Barista ee halkaan ku lifaaqan oo aad ka heli karo:

https://www.hennepinschools.org/images/downloads/HS_Child_Protection_Consent_Form.pdf